

## **Guddiga Maamul Wanaagga Maaliyadda: Hadalqoraalka kulanka oo kooban**

Kulanka 56aad ee 7da Nofeembar 2022

**Heshiiyada iyo Qandaraasyada Guud:** Wasiirka Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta ayaa ka warbixiyey waxyaabihii ku soo kordhay arrinta heshiiska 7-da xirmo shidaal ee lala saxeexday shirkadda Coastline iyo wax ka bedelka lagu sameeyey heshiiska. Wasiirku waxa uu iftiimiyay ansixinta Nidaamka Qandaraasyada, qorshayaasha lagu meel marinayo Hindise Sharciyeedka Dakhliga Kheyraadka Dhulka laga soo saaro iyo xeerarka muhiimka ah ee Shidaalka iyo Gaaska iyo sidoo kale sida ay Dowladda Federaalka uga go'an tahay qabashada tartanka furan ee lagu bixinayo heshiisyada shidaalka marka la helo dhammaan shuruudaha lagama maarmaanka ah. Guddiga Maamul Wanaagga Maaliyadda waxa uu carabka ku dhuftay muhiimadda ay hufnaanta u leedahay bixinta qandaraasyada shidaalka iyo gaaska ayna mar walba ka go'an tahay in ay siiso Wasaaradda Batroolka talooyin lagama maarmaan oo wax ku ool ah.

Kulanka ayaa waxaa lagu soo qaaday horumarka laga gaaray sidii loo heli lahaa kaalmada farsamo ee hanaanka qandaraas bixinta baasaboorka iyo sidoo kale u diyaar garowga xayeysiinta qandaraasyada saadka iyo shidaalka hey'adaha laamaha amniga.

**Bangiga Dhexe iyo Arimaha Dhaqaalaha:** Guddoomiyaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ayaa kulanka uga warbixiyay dadaalka joogtada ah ee Bangiga ee ku aaddan dib-u-habaynta arrimaha maaliyadda iyo taageerada hey'adaha maaliyadda ee dalka oo ay ka mid yihiin horumarinta iyo toosinta nidaamka lacag bixinta qaranka, habaynta akoonada si loo sahlo diridda iyo soo diridda lacagaha dibadda iyada oo la soo dhaqangelinayo nidaamka IBAN-ka. Sidoo kale isdhexgalka dheeraadka ah ee u dhexeeya Bankiga Dhexe iyo Wasaaradda Maaliyadda iyo ku fidinta adeegyada Bangiga dalka oo dhan. Bangiga Dhexe waxuu sidoo kale ka shaqaynayaa dhamaystirka iyo diyaarinta sharciyo muhiim u ah dib-u-habaynta waaxda maaliyadda oo ay ku jiraan Hindise Sharciyeedyada lacag-bixinta qaranka iyo caymiska iyo sidoo kale wax ka beddelka Sharciga Hay'adaha Maaliyadda iyo Sharciga lagu aasaasay Bangiga Dhexe. Kulanka ayaa lagu soo qaaday warbixin ku saabsan waxyaabihii u qabsoomay Bangiga Dhexe, waxaana la isla gartay in

la diyaariyo qoraal talo bixin ah oo ku saabsan dib u habeynta Bangiga Dhexe iyo Maaliyadda si loo milicsado horumarka iyo casharrada laga bartay dib u nidaaminta Bangiga.